**Amarka lamb. 3**

**Anshaxa Beerista Suufka**

## MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOMALIYA

## XOGHAYAHA GUUD

Kadib markii la arkay sharciga 4 Nofember 1951 lamb. 1301 oo ansixiyey Heshiiska Maamulida Dhulka Somaliya ee dalka Talyaaniga kaas oo siiyey awood buuxda ee fulineed.

Kadib markii la tixgeliyey sidii loogaga hortegi lahaa dhibaatoyinkii ay la kulmeen shirkadaha suufka beera kana ganacsada.

Kadib markii la arkay baahida loo qabo xeer nidaamiye ka soo aroora Heshiis Maamulida iyo xaladaha uu dalka u suggan yahay oo loo baahan yahay in mudnaan la siiyo.

Kadib markii laga garwaaqsaday qodobada 15, 16, iyo 17 ee Heshiiska Maamulka Walaayada Talyaniga , in fursado loo abuuro ciddi haysato aqoonta, khibradda iyo maal lagu hormarin karo Dalka.

Kadib markii la ogaaday in ay baahi ka jirta in la soo saaro xeerar nidaamiye Dalka ee la xiriira howlaha soo saarka, warshadeynta iyo ganacsiga suufka.

Kadib la arkay dekreto lamb 51 ee 26 Abriil 1951 oo xusaaya qabsamadii loo maareeyn karo ka hortagidda cayaayaanka beeraha sufka.

Kadib amarkii la arkay Amar-sharci lamb17 ee 15 Setembar 1951ee khuseeya horumarinta dhaqaalaha Dalka.

Kadib markii la dhegeystay aragtida Guddonka Dalka.

## WAXAA LA AMRAY

### Cutubka 1aad

Beerista Suufka

#### Qod. 1

Xafiiska Beeraha iyo Xoolaha ee Maamulka Walaayada Talyaania ee Somaliya, oo loo magacaabi doono ‘ Xafiiska Beeraha’ iyo Degaamada waxaa loo xilsaaray in la beero suufka iyadoo la dhowri doono beeraha loogu tala wixii dalag oo cunto in ay yaraanin.

#### Qod. 2

Xafiiska Beeraha, wuxuu caddeyn doona nooca abuurka suufka iyo baxaalkiisa ha ahaado abuur dibedda laga keeno ama mid dalka laga helo isagoo la tixgelin doono noocyada dhulka abuurka lagu suubin doono.

#### Qod. 3

Xafiiska Beeraha wuxuu mas’uul ka yahay:

1) — In uu baaro abuurka dibedda laga keeno in uu qalmo tekniko iyo beerista, kuwaaso baaritan la gelin doono oo ka mid tahay in beeris uu istaahil.Markaas kadib ayaa amarka in la abuuri karo la bixin doona amase in dib loo nadiifiyo ama la gubi doona .

Nadifiidinta abuurka waxaa mas’uul ka ah Adeega Fitopatologico waxaan kharajkooda bixin doona cidda iska leh abuurka isagoo raacaya nidaamka Xafiiska Beeraha.

Baabi'inta abuurka waxaa mas'ul ka Adeega Dogaanada, qofkii iska lahaa abuurka xa uma laha in dib loogu celiyo kharajkiisa;

2) — Xafiiska Beeraha wuxuu baari kara abuurka laga helo dalka dhexdiisa haddii loogu tala galay in la abuuro;
3) — Wuxuu xaq u leeyaha in uu bixiyo shahaado khuseeya abuurka, in uu ogaado goobaha lagu beeri doono dalka gudahiisa,
4) — In uu kormeero in la beeray abuurka loo fassaxay oo keliya.

**Qod. 4**

Abuurka suufka goobaha aan biyaha la gaarsin Karin waxaa la beeri kara oo keliya xilliga Gugga.

**Qod. 5**

Xafiiska Beeraha wuxuu u oggoladay ganacsiga abuurka suufka shirkadaha, hey'adaha gaarka loo leeyahay oo ka haysato ruqsad sida ku cad qod. 16.

Liiska hey'adaha u xil saran qeybinta iyo ka ganacsiga abuuka waxaa lagu soo dhejin doona xafiisyada Guddomiyayaasha iyo Degmoyiinka.

**Qod. 6**

Beeraleyda rabto in ay markale beerto abuurka ka yimaaday dalagga beertiisa, waxaa wajib ku ah in uu ruqsad ka soo qaato kadib markii la baaro abuurka Xafiiska Beeraha.

Ganacsiga iyo qeybinta abuurka suufa waxaa loo ogol yahay oo keliya ciidi loo xilsaaray sida uu qabo qodobkaa sare ku xusan.

**Qod. 7**

Keenista abuurka sufka waxaa loo baahan yahay in la helo fassax Xafiiska Beeraha iyo midka Xafiiska Sarifka & Ganacsiga Dibedda.

**Qod. 8**

Codsi keenista abuurka suufka waa in lagu caddeyaa nocyadaa abuurka la keeni doono.

**Qod. 9**

Mar allaliyo markii abuur dibedda laga keeni doono waa in ay la socota shahaado caddeynayo goobta laga keenay iyo cafimaadkiisa.

**Qod. 10**

Abuur loogu tala galay in la geeyo goobaha lagu beeri lahaa waa in lagu xanaaneyo jawaano afka loogaga xiray macdan ay ku xirtay Adeega Cafimaadka ee Xafiiska Beeraha.

Ciddii u xilsaaran qeybinta ama ka ganacsiga abuurka loogu tala galay in la beero, ha ahaado mid dibedda laga keenay amase mid dalka dhexdiisa laga beeray waa in ogeysiiyaan Xafiiska Beeraha dhaqdhaqaaq kasto iyo halka la geyn doono abuurkaasi.

Kadib markii ay dhamaato xilligi abuurista waxaa waajib ah in la ogeysiiyo tirada abuurka haray. Kuwaas oo loo soo gudbin doono dhinaca warshadeynta ama xoolaha, madama aanan loo istimaali Karin in mar kale la beero.

Abuurka loogu tala galay in xoolaha la siiyo waa in marka hore la nadiifiyaa si ku cad qod. 3, meelo qufulanna lagu keydiyaa.

## Cutubka 2aad

Beeraleyda oo dhaqaale abuurka tooska ah

### Qod. 11

Beeraleyda doonaya in dhaqaale toos galaan, abuurka suufka waxaa looga gedi doona degmooyinka ama shirkadha, hehy'adaha gaarka loo leeyahay oo qaabilsan howlahaas sida ku cad qod. 5.

Beeraleydaasi waa in ku jaan gooyaan bahidooda codsiga abuurka suufa tirada ay uga baahan yihin in ay beeraan.

Ciddi ka ganacsaneysa abuurka suufka waa in ay ku soo bandhigtaa xafiiska Deegaanka liiska dadkii ka gatay, tirada abuurka ay gateen iyo goobta lagu beeri doono. Liiskaasi waa mid u furan dadweynaha ciddii doneysa.

### Qod. 12

Guddomiyaha qaabilsan waa in uu qondeeya markii la gaaro waqtiga uu dagalka soo go'aayo goobihi suuqa ahaa iyo maalmaha loogu tala galay in la suuq geeyo suufa dalagga.

Codsi dabeed, kadib markii laga baaray in suufkuu wadanin wax cayayaan ah, wuxuu Guddomiyaha deeganku amri kara in suufkaasi la beec geeyo suuqya kale.

### Qod. 13

Beeraleyda tacabka tooska ah fuliyey, wuxuu geeyn kara suufkiisa, kadib markii laga baaray in cayayaan lahayn goobaha loogaga bixiyo unugyada oo ugu dhaw.

Amaradda ku qoran qod. 12 laguma dabaqi karo beec geeynta suufka la tidcay.

### Qod. 14

Arrimaha la xiriira beeraleyda tacabka tooska ah ee suuqgeynta suufa, daabulidda, iyo heshiisyada kala gadashada waa lagu fulin doona goobaha iyo maalmaha suuqyada eek u qoran qod. 13.

### Qod. 15

Ciddi haysata amarka ka ganacsiga jumlada ah sida ku qoran Amar sharci lamb 17 ee 15 September 1951, ama maamulo goobaha loga bixiyo abuurka suufka, o haysata fassaxa sida ku tilmaaman qodobka soo socda, waxaa uu ka soo iibsan karan suuf jumla beeraleyda tacabka tooska ah beerta sida ku xusan qodobka sare ku.

## Cutubka 3aad

Heeshiyada Wadareed

### Qod. 16

Degmo kasto waxaa heshiis wada geli karo in la beero suufka shirkadaha, hey'adaha gaarka loo leeyahay oo ka shaqeeysta isla aagasi oo haddana haysta fassax gaar sida ku xusan qod. 25.

### Qod. 17

Markii la galaayo heshiyada la xirira beerista wadared waxaa qasab in la dhowro nooca heshiiska ku lifaqaan amarkaan oo qeyb ka ah.

Guddomiyuhu wuxuu fassaxi kara heshiisyo gaar ah oo keliya makii ay jiraan marxalado khaas ah oo u baahan in la isticmaalo qalab iyo aalado shaqada lagu fuliyo si loo kobciyo wax soosaarka tacabka iyo dib u bacriminta dhulka beeraha suufka loogu tala galay.

**Qod. 18**

Heshiisyada beeriska suufka oo si wadar loo galay waxaa iyagoo laba nuqul ah loo soo gudbin doona xafiiska Guddomiyaha ee qaabilsan goobahaas iyadoo lagu xiray liis warbixin kooban.

Guddomiya deegank waxay keydin doonaan liiska warbixinadaasi si ciddii doneysa ay u arki karaan.

Heshiisyada aanan Guddomiyaha uusan saaran in uu horay u arkay waa mid aan jirin.

**Qod. 19**

Beeraleyda si wadar ah u heshiiyey waxay heli doona abuur si lacag la'aan ah

**Qod. 20**

Qiimaha suufka oo jawaanle ah oo si wadareed loo abuuray waxaa sar go'in doona Guddiga ka kooban:

1) Guddomiyaha, Garsoorka Somalia oo ku shaqeynaya sidii Xaakim khilaafka arrimaha dhaqaalaha sida ku qoran qod. 6 ee Amar-sharc lam 17;
2) Xubnaha: waa 5 wakiil ee ka socada beeraleyda heshiiska wadareed oo uu soo magacaabay Guddonka Dalka;
   Shan wakiil ee shirkadaha, hey'adaha gaar, maalqabeenada oo ay soo magacabtay Rugta Ganacsiga.

**Qod. 21**

Guddigu wuxuu isku imaan doona sanad kast ka hor 15 Oktober wuxuu go'aamin doona tira dheere. Guddomiya wuxuu xaq u leeyahay in ay coddeyaan.
Guddigu wuxuu awood u leeyahay dib u habeeynta qiimaha suufka kadib markii uu codsado Maamulaha Guud ama ugu yaraan 5 xubnood.

**Qod. 22**

Haddii ay noqoto in suufka lagu tacbay si wadareeda la wareejiyo ka hor intii uusan qiimahiisa aanan weli sal dhiganin, ciddi qaadaneyso waa in ay siisa beeraleyda, caddeyn ay ku qoran yihiin:

a) Tilmamaha beeraleyda;
b) Tirada, nooca iyo qaabka dalaga;
c) Lacagta lagu leeyahay, qiimaha la filaayo iyo waqtiga la filaayo in la soo dhejiyo.

Haddii uu beeraleydu codsado, waxaa loo ogolan doona in lacag hormaris la siiyo oo aan ku jirin midda heshiiska ahi.

**Qod. 23**

Wixii muran ah ee ka dhashao howlaha wareejinta dalaga waa in la gaarsiya Xafiiska Guddomiyaha, kaas oo u bandhigi doono xafiiska teknikada ee Beeraha.

**Qod. 24**

Ciddi doneysa in ay hesho fassax ku tilmaaman qod. 16 waa in codsi rasmi ah keena xafiiska Guddomiyaha aaga laga xukumo.

**Qod. 25**

Codsiga waa in lagu caddeya:

a) Magaca oo seddaxan, rugta uu codsadahu ku nool yahay, shaqadiisa, rugta shirkadda ama hey'adda;
b) Tirada malgashiga loogu tala galay heshiis wadareedka;
c) Liiska howlaha horumarinta beeraha iyo maalka la doonayo in la geliyo abuurka beerta;
d) Caddeymo in la leeyahay awood tekniko iyo dhaqaale iyadoo la carifaayo khibradda dhinaca abuurka suufka;
e) Daacadnimo in la muujin dono dhinaca dhowrista amarka horay u jiray iyo kuwa dib laga soo saari doono ka hor intii la siinin fassax iyo dammanada ku qoran faqradda lamb 8 ee qod. 28.

**Qod. 26**

Guddomiyeeyasha Gobollada ayaa fassixi doono qod. 16 kadib amarka ay ka helaan Xafiiska Maamulka.

Haddii loo diido fassaxaasi waan in la sababeeyaa.

Codsado haddii loo diido fassaxa wuxuu furi karaa dacwad madani ah ee lid ku ah Maamulka oo la hor geyn doo Gaarsooraha Somaliaya oo ku shaqeyn doono sidii Xaakim go'aamin doo dacwooyinka dhaqaalaha sida ku cad Amarka lamb. 17 qodobka lamb.6.

**Qod. 27**

Fassax ku qoran qod. 16, oo sida la fiilayaa in uu kor u qaado qiimeynta dhulka beerta ah iyo maalka la geliyey wuxuu socon doonaa ilaa 7 sano.

**Qod. 28**

Fassaxa lagu amray qod. 16 wuxuu awood u siin doonaa ciddi heshay:

1) In uu ka iibiyo abuurka beeralyeda rabo tacabka tooska ah;
2) In uu iibsado suufka lagu tacbay si wadareedka;
3) In uu kala shaqeeyo Maamulka Walaayada mareeynta qalabka teknikada iyo xayeysiika dalaga;
4) Fulinta waajibaadka heshiiska wadareed, gaar ahaan soo uruurinta dalaga, lacag bixinta qiimaha markii la go'aamiyo;
5) Maareynta habka ugu macquul san ee soo uruurinta dalaga;
6) Kormeeridda in beeraleydu beerta abuurka horay loogu qeybiyey;
7) La shaqeynta xafiisyada u qaabilsan in kadib dalaqa la soo ururiyey in la baa'biyo haraaga beeraleyda u soo haray;
8) In la dhigo, si hab damiin ah oo aan ka yareen So 20.000 ee Maamulaha Walaayada oo u dhigma qeybta malgashida;
9) Fulinta wajiibadka ku xusan qod 3, 5, 6,7 qof cawiimaad oo leh ilaa 6,000 o darab ee dhul beereed, iyo Cutubka beeraley oo leh ilaa 2,000 oo darab. Kuwaas oo loo baahan yahay in ay la shaqeeyaan xafiiska deegaanka dhinaca beeridda sufka.

**Qod. 29**

Codsiga dib u cusboneysiinta ama fassaxa cusub sida ku tilmaaman qod. 16 waa in la horgeeya ilaa 10 Janaayo ee sanadkasta.

**Qod. 30**

Maamulaha Guud wuxuu tixgelin doona markii la baarayo dib u cusbuneeysiinta fassaxa ee qodobka sare ku qoran howlaha ay shirkadda ay suubisay muddadi dalagii hore:

- Dhinaca howlaha dib u habeynta dhulka si loo hormariyo tacabka;
- Horumarinta beerista dhulalka cusub iyo hor dhiska abuurista la xiriira dalaga cuntada ah;
- Kaalinta teknika la isticmaalay;
- Dhowrista iyo ka hortagga iyo la dagallanka cayayaanka.

**Qod. 31**

Haddii la fulin waayo amarada qeybta faayadhowrka la soo saray ama la amaray, waxaa lagu dhaqaaqi doona in la baa’bin doono abuurka intii haaraa ah.

Baa’binta waxaa lagu fulin doonaa iyadoo uu Xaafiska Beeraha ay kormeereysa, kharajkana uu beeraleydu bixineya.

**Qod. 32**

Haddi ay xadgudb uu sameeyo cidda iska leh fassaxa sida ku qoran qod. 16 iyo nidaamka halkan ku qoran, wuxuu Maamuluhu awood u leeyahay isagoo tixgelinaaya culeyska xadgudbkasi in uu la wareego qeyb amaba kulligeed dammanadii la dhigay ama lagal noqdo fassaxa shatiga.

Lacagta lagala wareegay waxaa qar ka mid ah ama gebi ahaanteed la sii doona ciddi ay dhibaato ka soo gaarto fulin la’aanta amarkaasi.

Ciddi lagu fuliyey go’aanka Maamulaha wuxuu xaq u leeyahay in uu furto dacwo madani ah Garsooraha Somalia hortiisa oo ku shaqeyn doono Xaakim dacwooyinka dhaqaaleh sida ku cad qod. 6 ee Amarka lamb. 17.

**Qod. 33**

Ciddi aan u hoggamsanin amaradda sharci ee halkan ku qoran wuxuu muteysan doono ciqaabaha ku tilmaamn qod. 650 ee Xeerka Ciqaabta Talyaaniga.

**Qod. 34**

Amar sharcigaan wuxuu hirgeli doona markii la faafiyo, isla markaasna waxaa la buriyeey xeer iyo nidaam kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon Karin qodobadaan.

Muqdisho, 21 Maarso 1952.

Maamulaha Guud

**Fornari**